

Caawimaada Dhaqaalaha - Xogta Kooban ee Luuqada Fudud (PLS)

Central Maine Healthcare (CMH) waxay ku dadaalaysaa inay daawayso dhammaan bukaannada u baahan daryeelka ayadoon laga eegayn xaaladooda caymiska caafimaadka ama dhaqaalaha. Xeerka Caawimaada Dhaqaalaha ee CMH wuxuu bixiyaa daryeelka caafimaadka ee xaalada degdega ah iyo kuwa caafimaad ahaan muhiimka ah lana siiyo dadka u qalma, ee aan caymiska haysan iyo qoysaska aan awoodin inay dhiibaan qarashka daryeelka caafimaadka.

Adeegyada U qalma: Adeegyada xaalada degdeg ah iyo/ama kuwa caafimaad ahaan muhiimka ah ee ay bixiyaan adeeg bixiyaasha Shabakada Central Maine Healthcare ee hoos ku qoran.

Bukaannada U qalma: Bukaannada aan lahayn caymiska ee dakhligoodu ka hooseeyo 200% Xadiyada Fakhriiga Federaalku u dajiyay ee hadda jira marka laga eego tirada qoyskooda ee gudbiyay Codsiga Caawimaada Dhaqaalaha (ayna ku jiraan dukumiintiyada/xogta qusaysa), kuwaas oo la go'aanshay inay u qalmaan caawimaada Dhaqaalaha.

Qaybta Tirada Qoyska	CMMC, BH, Caawimaada Daryeelka bilaashka ah RH 00% (200% FPL)
1	\$27,180
2	\$36,620
3	\$46,060
4	\$55,500
5	\$64,940
6	\$74,380
7	\$83,820
8	\$93,260

Qof kasta oo dheeraad, ku dar cadadkaan.	\$9,440
--	---------

Waxaa la cusboonaysiiyay Juun 7, 2022

Caawimaada la bixiyo: Dakhliga qoyska ee le'eg 200% ama ka hooseeya Heerka Fakhriga Federaalka (FPL) dadka u qalma ee dagan Maine ayaa heli doona qiimo dhimis 100% oo ku aadan baaqiyada ayaga kusoo aada oo ka dhasha lacag ka badan cadadka Caadiyan Laga Qaado bukaannada leh caymiska. Haddii aan qof u qalmin caawimaada Dhaqaalaha, wuxuu xaq u leeyahay inuu codsado dhagaysiga caddaalada ah. Isbitaalka ayaa u sheegi doona sida ay u codsanayaan dhagaysiga.

Marka dhacdo in qofku bixin waayo lacag la go'aanshay in bukaanka/damiinka bukaanku masuul ka yahay, aana la codsan caawimaada, isbitaalku waxa uu daynta u diri karaa wakaalad banaanka ah oo lacagta kasoo qaada qofka. Falka noocaas ah ayaa keeni kara in calaamad xun la saaro sumcada dayn bixinta ee bukaanka/damiinka ama lagusoo oogo dacwad sharci.

Sida loo Codsado: Xog ku saabsan caawimaada dhaqaalaha iyo codsiyada ayaa laga heli kara abarta oonleenka ah oo ah <https://www.cmhc.org/billing-and-financial-information/financial-assistance-at-cmhc>. Si aad u hesho nuqulka bilaashka ah ee xeerka caawimaada Dhaqaalaha iyo codsiga iyo caawimaad lagaa siiyo codsigaaga,, waxaad nagasoo wici kartaa (207) 795-8050, ama nagusoo booqo:

Xafiiska Adeegyada Dhaqaalaha ee Bukaanka

29 Lowell Square, 1st Level

Lewiston, ME 04240